



Dadka Qaata FoodShare:

Waxaa laga yaabaa in aad hesho FoodShare dheeraad ah haddii ay jiraan kharashaad ah kuwa caafimaadka oo aad adigu jeebkaaga ka bixiso.

(FoodShare Members: You may be able to get more FoodShare benefits if you have medical expenses that you pay out of your own pocket.)

- Ma qaadataa manaafacaadka FoodShare?
- Ma tahay qof gaaray ama ka weyn 60 jir, indhoole, ama naafo?
- Miyey jiraan kharashaad caafimaad oo ah kuwa aad adigu jeebkaaga ka bixiso?

Haddii aad "Haa" uga jawaabtay saddexdaas su'aalood, waxaad heleysaa FoodShare dheeraad ah. Sababtu waa in laguu xisaabiyo lacagta aad ku bixiso kharashaadka daawooyinka caafimaadka qaarkood. Habkaas waxaa la yiraaahdaa xisaabinta kharashka caafimaadka.

Tusaaleyaasha kharashaadka caafimaadka ee la aqbalayo waxaa ka mid ah:




Daawooyin
dhakhtar qoray



Daawada la iska
soo iibsado



Kharashaadka
ceymiska



Ookiyaale iyo
baliisha indhaha

Faahfaahin kale raadso:

Si aad u hesho faahfaahin dheeraada oo ah FoodShare waa in aad soo sheegto kharashaadka caafimaadka qaarkood, xafiiska kula soo xiriir teleefan, waraaq, fakis, ama in aad timaaddo. **Waxaad xafiiska deegaankaaga ka baaran kartaa barta dhs.wi.gov/forwardhealth/imagency/index.htm.**

Macluumaadka kharashaadka caafimaadka iyo sida ay u shaqeeyaan, faahfaahinta oo buuxda ka eego barta: www.dhs.wisconsin.gov/publications/p03315b.pdf.

Miyaadan qaadan manaafacaadka FoodShare? Waxaa jirta afar hab oo loo codsan karo:

Intarnetka. Ku soo codso barta intarnetka ee ACCESS access.wi.gov.

Taleefan. Si aad taleefanka ugu soo codosado, soo garaac taleefanka xafiiska.

Waraaq ama fakis. Si loogu soo codosato waraaq ama fakis, codsiga oo buuxa waa in loo diro xafiiska deegaanka.

In la yimaado. Si loo codosado adigoo xaadir ah, waa in la yimaado xafiiska deegaanka. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato in aad ballan sameysato.

Hawshan waxaa lagu maalgeliyay ugu yaraan qeyb ka mid ah lacagaha federaalka ee ka yimid U.S. Department of Agriculture (Waaxda Beeraha Mareykanka). Waxyaabaha halkan ku qoran ma aha wax toos uga tarjumaya aragtida ama shariiyada U.S. Department of Agriculture (Waaxda Beeraha Mareykanka), oo sidoo kale ma aha halkudhegyo ay leeyihiin, wax ay dadka u hayaan, ama ma aha urur ay taageerto dowladda Mareykanka.